



## Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

### Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya oo hadal-qoraal ka soo saaray horumarka laga gaaray geeddi-socodka siyaasadda

Muqdisho, 23 July 2012 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya, Dr Augustine Mahiga, ayaa maanta soo dhoweeyay horumarka laga gaaray dhammeystirka iyo xaqijinta ergada Golaha Qaran ee Ansaxinta Dastuurka. Waxaa maalinta Arbacada ee toddobaadka billaabmaya 9kii maalmood ee shirka Golaha Qaran ee Ansaxinta Dastuurka, halkaasoo looga doodayo, loogu codeynayo, laguna ansaxinayo dastuurka ku meelgaarka, kaasoo noqon doona asaaska ay ku shaqeynayaan hay'adaha federaalka Soomaaliyeed ee cusub wixii ka dambeeya bisha Agoosto 2012. Dastuurku wuxuu kaloo noqon doonaa asaaska isbedelka dastuureed ka hor intaan ugu dambeyntii lagu ansaxinin afti dadweyne.

“Waxaa dhiirrigelin leh inaan aragno horumarka la gaaray,” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah Mahiga. “Waxaan ugu baaqayaa dhammaan odey dhaqameedyada Soomaaliyeed iyo madaxda siyaasaddaba inay la yimaadaan dhammaan wixii hawlo ah ee lagama maarmaan ah si loo qabto waqtigii loogu talagalay, hawlaasoo ay ku aamineen dadka Soomaaliyeed si Soomaaliya loogu horseedo mustaqbal siyaasadeed ee cusub.”

Madax dhaqameedyada Soomaaliyeed waxay ku qaadataw dhowr toddobaad iyagoo ku hawlanaa soo xulidda xubnaha 825ka ah ee Golaha Qaran ee Ansaxinta Dastuurka, ee laga soo xulay dhammaan qabiillada Soomaaliyeed iyo dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed iyadoo la raacayo nidaamka 4.5. Hawshan waxay hadda maraysaa meel gebagebo ah. Guddiga Farsamo ee Xulidda (TSC), oo la shaqeynaya kormeerayaasha caalamiga ah, ayaa xaqijinaya heerka tayada xulidda, wuxuuna maanta ku dhawaaqay in 816 ka mid ah ergada 825ka ah la dhammeyay baaritaankooda, 763 xubina ay magaalada Muqdisho ku suganyihiin.



## **Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

Golaha Qaran ee Ansaxinta Dastuurka ayaa hadda billaabaya shir qaadanaya 9 maalmood oo loogaga doodayo qaybo-qoraalka dastuurka ku meelgaarka ah. Ergeyga Gaarka ah wuxuu ku nuuxnuuksaday muhimmada ay leedahay kaalinta ergada ee geeddi-socodka siyaasadeed ee hadda socda si loo xaqijiyo in dadka Soomaaliyeed ay helaan cod metela. “Dastuurka Ku-Meelgaarku wuxuu noqon doonaa tiirka uu Baarlamaanka Cusub uu ku dhisi doono Soomaaliya Cusub,” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah. “Hawsha Odey Dhaqameedyada, Guddiga Farsamo ee Xulidda iyo Golaha Qaran ee Ansaxinta Dastuurka waa inay xaqijiyaan in geeddi-socodku uu sii ahaado mid sharci ah, mid lala xisaabtami karo, mid hufan, mid laga wadaqaybgalo, mid loo wada dhanyahay iyo mid ay Soomaalidu hogaaniso, oo ah tan ugu muhimsan.”

“Waqtigan waa waqtii ay Soomaalidu ay aad u hanweyntahay”, ayuu yiri Danjire Mahiga, “Tani waa dhacdo aad u weyn oo imanaysa ka dib markii la qaaday tallaabooyin waaweyn oo ka mid ah geeddi-socodka dheer ee Qorshe-Hawleedka Roadmap-ka. Waa horumar muhim ah oo laga gaaray dhammeynta marxaladda ku meelgaarka, loona dhiso hay’ado siyaasadeed si loo helo dowlad xasilloon oo shaqaynaysa ee Soomaaliya ka dhalata ka dib 21 sanno oo la soo maray colaad siyaasadeed iyo dagaal sokeeye.”